4. Xadhiq xerada gudaheeda ah oo ka bilaabma hal maalin ilaa kow iyo labaatan cisho (1-21) oo derejo kasta lagu qaadi karo.

5. Xadhiq qolka Ilaaliyaha ah maalin ilaa kow iyo labaata maalmood (1-21) oo lagu qaadi karo Alifle ilaa Askari.

6. Joojin hal korodhsiimo hadiiba ay jirto.

7. Digniin kama dambays ah oo shaqo ka erineed oo qoraal ah haddii lala yimaado gef asluubeed oo kale.

8. Derejo dhimid ama ka goyn gunno gaar ahaaneed derejo kasta oo xubnaha Ciidanka ka mid ah.

9. Shaqo ka laalid (Suspension) oo derejo kasta la saari karo.

10. Shaqo ka saarid (Discharge) xubnaha derejo kasta

11. Shaqo ka eryin (dismissal) derejo kasta.

12. Shaqo ka eryin (Expulsion) sharaf darro awgeed oo xubin kasta lagu qaadi karo.

Qodobka 75 (Saaridda Cigaabta)

Ciqaabaha waxa saari kara:-

B. Taliyaha Ciidanka wuxuu awood u leeyahay ka laalista shaqada dhammaan Saraakiisha Ciidanka iyo erista shaqada dhammaan Xubnaha kale ee Ciidanka heer qaran.

T. Duqa Magaaladu wuxuu awood u leeyahay ka laalista iyo ka erista xubnaha ciidanka heer deegaan oo aanay ku jirin Saraakiishu.

J. Saraakiisha guud iyo Saraakiisha Sare (General or senior officer) waxay awood u leeyihiin:-

I. Ku xidhida xerada Saraakiisha ka hoosaysa iyo Kormeerayaasha maalin ilaa kow iyo labaatan cisho;

11. Ku xidhidda qolka Ilaaliyaha derejada Saddex Alifle iyo ilaa Askari maalin ilaa kow iyo labaatan cisho (1-21)

X. Saraakiisha hoose waxay awood u leeyihiin:-

1. Xadhiq Saraakiisha ka hooseeya 7(Todooba )maalmood oo lagu hayo Xerada.

11. Ganaax lacageed oo aan ka badnayn 1/5 (Shan meelmood meel) oo mushaharka bileed ah ama ku xidhidda xerada muddo aan ka badnayn 10 (Todoba) maalmood kormeerayaasha oo keli ah.

111. Xadhiq golka ilaalinta maalin ilaa kow iyo labaatan maalmood derejada saddex Alifle iyo ilaa Askari.

Kh. Kormeeraha fadhi ka madax ah wuxuu awood u leeyahay:-

I. Canaan qoraal ah oo loo geliyo galka derejada kormeere ilaa ka hooseeya.

II. Xadhig lagu hayo golka Ilaaliyaha maalin ilaa 15 maalmood Alifle ilaa Askari.

D. S/Alifle ama L/Alifle fadhi xukumaa wuxuu awood u leeyahay:-

I. Inuu ku xidho xerada maalin ilaa 5 maalmood S/Alifle kasta oo ka derejo hooseeya iyo L/Alifle.

II. Inuu ku xidho golka Ilaaliyaha maalin ilaa 10 maalmood Alifle iyo Askari kasta oo fadhigiisa ka tirsan.

**Qodobka 76 (Awoodaha kale ee Taliyaha)**

Taliyaha Ciidanku wuxuu saari karaa Ciqaab kasta oo ka mid ah kuwa Qodobka hore soo sheegay xubin kasta oo ka tirsan Ciidanka. Marka xubin Ciidanka ka mid ah lagu eedeeyo gef asluubeed culus amaba lagu tuhunsan yahay, gefkaas oo ay natiijadiisu noqon karto shaqo ka eris, shaqo ka saarid, derejo ka dhimid ama shaqo eris sharaf darro awgeed. Taliyuhu wuxuu u Magacaabi karaa guddi asluubeed oo baadha xaqiiqada dacwadda soona jeedisa ciqaabta ku haboon. Shaqo ka erista ama shaqo ka saarista, derejo-ka-dhinka iyo shaqo ka erista sharaf darro awgeed waxay ku soo baxaysaa markuu Sarkaal yahay Xeer Madaxweyne.

2. Xaalado gaar ah awgeed ama markay ula muuqato Taliyaha Ciidanku wuu cafin karaa gefaf asluubeed.

**Qodobka 77 (Racfaan)**

Xubin kasta oo ka mid ah Ciidanka oo lagu ciqaabay gef asluubeed marka loo eego Xeerkan ee ay ula muuqato in ciqaab xaq darro ah la saaray ama ciqaabta la saaray tahay mid dheeraad ah, wuxuu racfaan qoraal ah u soo gudbin karaa Madaxdiisa awoodda u leh 15 casho gudahood marka laga bilaabo Taariikhda ciqaabta la saaray.

2. Haddii aanay xubin raaligelin racfaanka, wuxuu mar kale racfaan qoraal ah u soo qoran karaa Madaxda kale ee ka sareysa 30 casho gudahood oo laga bilaabo taariikhdii la ogeysiiyey natiijadii racfaankiisa. Xubnuhu waxay mar kasta xaq u leeyihiin inay racfaan u qortaan Taliyaha ama Duqa Magaalada iyagoo u maraaya jidka habboon.

3. Racfaan kasta oo ka dhan ah Go'aanka Taliyaha Ciidanka ama kan Duqa magaalada waxaa loo qoran karaa Wasiirka arrimaha Gudaha.

4. Iyadoon Xeerkan waxba loo dhimayn, waxba kama horjoogsan karaan Xubnaha Saraakiisha Ciidanka marka ay soo dhamaystaan Xuquuqda uu Xeerkani siinayo inay cabasho (Petition) u soo qortaan Madaxweynaha oo ah Taliyaha Guud ee Ciidamada Qalabka sida una soo maraan jidka habboon.

**Qodobka 78 (Gudbinta Racfaanka)**

Sarkaal kasta ama xubin kasta oo fadhi xukunta oo loo soo qortay Racfaan Ciqaab-Asluubeed ah, una soo qortay xubin uu Madax u yahay, isagoo raacaya habka uu Xeerkani tilmaamayo waa inuu u gudbiyaa Madaxda awooda u leh, isagoo soo raacinaaya talo-bixintiisa.

## Qaybta 12aad
## Abaalmarinnada hawlaha Boliiska.

**Qodobka 79 (Aqoonsiga Mutaysi gaar ahaaneed ee shaqo)**

Abaalgud gaar ah waa la siin karaa xubin kasta oo qabatay hawl gaar ahaaneed oo dabeeco khaas ah leh oo ka sarreysa hawshiisii caadiga ahayd.

**Qodobka 80 (Abaalgudyada la bixin karo)**

Xubnaha Ciidanka Boliiska waxaa la siin karaa abaalgudyadan soo socda:-

B. **SARAAKIIL.**

- Amaan caadi ah;
- Amaan gole-jooq;
- Abaablgud qiimayn ciidan;
- Dalacaad abaalmarin gaar ahaaneed;
- Bilad sharaf ama bilad Geesi;

T. **KORMEERAYAAL IYO SARAAKIIL XIGEEN.**

- Amaan caadi ah,
- Abaalgud lacageed;
- Abaalgud fasax ilaa 15 beri;
- Amaan gole-jooq;
- Abaalgud qiimayn Ciidan ama hawl Boliis;
- Dalacaad abaalmarin gaar ahaaneed;
- Bilad Sharaf ama Bilad Geesi.

J. **ASKARI.**

- Amaan caadi ah;
- Abaalgud lacageed;
- Amaan gole-jooq;
- Abaalgud qiimayn hawleed;
- Bilad sharaf ama Bilad Geesi;
- Dalacaad abaalmarin gaar ahaaneed;
- Fasax abaalgud ilaa 10 maalmood.

2. Taliyaha Ciidanka Boliisku wuxuu awood u leeyahay inuu Ciidanka heer qaran siiyo nooc kasta oo abaalgud ee kor lagu soo sheegay, marka laga reebo dalacaada saraakiisha ee abaalmarinta gaar ahaaneed iyo bilad sharafta. Duqa Magaaladu wuxuu leeyahay awood la mid ah tan Taliyaha Ciidanka marka loo eego Ciidanka heer deegaan.

3. Madaxda Xilka soo socda waxay awood u leeyihiin inay bixiyaan abaalgudyada soo socda, kaasoo ay siinayaan Xubnaha Ciidanka ee hoos yimaada:-

A. Taliyaha Qaybta ama Fadhiga amase xafiis ee la siman:-

- Amaan caadi ah xubnaha Ciidanka Boliiska heer Qaran ee derejo kasta;
- Fasax ilaa 10 beri ah saraakiisha, Kormeerayaasha, S/Xigeen iyo Askar.

B. Taliyaha Saldhigga ama fadhiga ama fadhiga la siman:

- Amaan caadi ah xubnaha Ciidanka derejada Kormeere, S/Xigeen iyo Askari.
- Fasax ilaa 5 Beri Kormeerayaasha, S/xigeenka iyo Askar.

Qodobka 81aad. FAAFINTA ABAALMARINTA

Sarkaal, Kormeere iyo S/Xigeen kasta oo siiya Abaalmarin Xubin Ciidanka ka tirsan waa inuu Dukumentiga Xafiiska ku muujiyo tilmaanta ama faahfaahinta Abaalmarinta, isla markaasna waa inuu Nuqul u gudbiyo Taliyaha Ciidanka si uu u Ansaxiyo oo loogu soo saaro Codka Ciidanka, loona geliyo Galka gaar ahaaneed(personal File) ee Xubinta loo gartay abaalmarinta.

Qeybta 13aad Xannaanada Boliiska

Qodobka 82 (samaynta Sanduuqa Xannaanada Boliiska)

Dhammaan Ganaaxyada ee la saaray xubin Ciidanka ah sida Xeer-nidaamiyahani qabo ama xeer kale ee ku yimid dembi kasta oo asluubta Ciidanka ka dhan ah iyo dhammaan ama qayb ahaan lacag kasta oo si aan caadi ahayn u soo gashay ama lagu helay hawl dheeraad aha oo uu qabtay Ciidanku ama Xubin ka mid ahi waxaa lagu darayaa Kayd loo bixin doono (Sanduuqa Xanaanada Boliiska) iyadoo aan waxba loo dhimin sharciyo kale oo jiri kara.

Qodobka 83 (Ogolaanshaha Taliyaha lacag ka-bixinta sanduuqa Xanaanada Boliiska)

Taliyuhu wuxuu awood gaar ah u leeyahay in lacag laga siiyo sanduuqa Xanaanada Boliiska dadka hoos ku tilmaaman:-

B. Xubnaha Boliiska ee derejadoodu tahay ama ka hooseyso Kormeere iyadoo loola jeedo abaalgud hawl mudnaan leh oo ay qabteen iyagoo waajibaadkooda gudanaya, haddii aan la ogolaan abaalgudkaas in laga bixiyo meel kale;

T. Macaawimo la siinayo Xaasaska iyo Ooriyaha xubnaha Boliiska ee Geeriyooday, ama xubin shaqada lagaga saaray Caafimaad darro awgeed;

J. Kharash lagu bixinayo horumarinta Goobaha Maaweelada iyo waxyaabo la mid ah;

X. Kharash lagu bixinaayo Tacliinta Ciidanka.

## Qeybta 14aad "Qodobada dhammaystirka Xeerkan"

### Qodobka 84 (Amarada joogtada ah)

Taliyaha Ciidanku wuxuu awood u leeyahay markii waqti la joogoba inuu soo saaro awaamiir joogto ah oo la xidhiidha hagaag u socodsiinta arrimaha uu dhigayo Xeer-nidaamiyahani ama sharciga dhismaha Boliiska, waxyaabahaas oo ku saabsan, Fasax, Shaqo-Qoris, Mushaharka, Beddelka, Shaqo ka saarid, Tababarada, isticmaalka Hubka iyo Rasaasta Lebiska iyo Qalabka, deegaanka Ciidanka, Shaqo qaybinta, habsami u gudashada waajibaadka Ciidanka, wadashaqaynta Ciidanka Boliiska heer Qaran iyo Deegaan iyo wixii awaamiir ah ee uu u arko inay fududaynayso hawlaha Ciidanka ama kartida iyo Anshaxa hagaagsan ee Ciidanka ama arrimo kasta oo la xidhiidha arrimaha kor ku xusan.

### Qodobka 85 (Tirtiridda Sharciyadii Hore)

Waxaa la baabi'iyey dhammaan wixii Xeer-nidaamiyaal ah ee ka soo horjeeda Xeer-nidaamiyahan.

### Qodobka 86 (Tallaabooyinkii la qaaday)

Wax alaale wixii talaabo ah ee la qaaday ka hor intaan Xeernidaamiyuhu soo bixin oo aan waafaqsanayn qorista Ciidanka iyo erista Ciidanka waa waxba kama jiraan.

### Qodobka 87 (Laalista dalacaadda si ku meel gaadh ah)

Dalacaada Ciidanka ee ku xusan Qodobka 45 Xubinta 1aad waxay ahaanaysaa mid laalan ilaa laga helaayo amar Madaxweyne.

### Qodobka 88.(Dhaqan galka Xeerka)

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu saxeexo Madaxweynuhu.

OF SOMALILAND President

(...mad Ibraahim Cigaal)
... a x w e y n a h a JSL.

(Muuse Biixi Cabdi)
W.W.Arr.Gudaha JSL